



## TALO IYO WARBIXIN KU SAABSAN ANTIBIYOOTIKADA IYO CAABUQYADA (INFEKSHANKA)

# Haddii Cunuhu ku Xanuunayo

Ama bakteeriyo ha keento ama fayras ha keeno infekshanka cunaha ku dhaca, intooda badani iyagaa iskood iskaga bogsada sbuuc gudihiis daawo la'aan. Haddii cunuhu ku xanuunayo oo isla markaasi Aad leedahay duuf, xabeeb, qufac iyo mararka qaarkood xummad/qando, waxa hubaal ah inuu ku hayo hargab amma duri uu keenay fayras. Waxa haboon inaad xanuunka noocaasi ah baxnaanisid si uu iskii iskaga baxo, sababta oo ah inaanay antibiyootiku xataa penicillin waxba ka tarikarin xanuunada firusku keeno. Waxa dhicikarta in todobaad cuna-xanuunku ku sii hayo.

Haddii waxa ku hayaa uu yahay cuno-xanuun iyo xummad aan waden duuf, xabeeb iyo qufac, waa xoqado amma xanuunka qumanka (halsfluss), oo marmar bakteeriyyada loo yaqaano 'istrebtokoker' keento.

Haddii xanuunka xoqadaha ee ku hayaa yahay mid sahan, antibiyootikadu waxba kaama tarikarto. Hase yeeshii, waa inaad qaadataa antibiyootika haddii uu ku hayo xanuun xoqadaha ah oo dhexdexaad ah amma noociisa ba'an ee istrebtokokertu keento. Laba ilaa saddex cisho ayay qaashada antibiyootikadu soo gaabinkartaa amma dhimikartaa muddada uu ku haynkaroo xanuunka xoqadaha ee ba'an.

### Dhakhtarku ma qaadi karaa shay-baadhi si uu u hubiyo in antibayootikadu wax ku tarikarto iyo in kale?

Haddii uu ku hayo cuno-xanuun aan wadanin qufac, xabeeb iyo duuf oo Aad se leedahay xummad ama qandho ka sareeysa 38.5 digrii iyo qanjo-barar cunaha ah iyo cadcadaan ka muuqda labada xoqadood (halsmandlar), kala badh ahaan xanuunkaasi waxa loo aaneeynkaraa inay sababtay istrebtokookar. Maa daama, aan eegmada indhaha lagu garankarin xanuunada istrebtokokartu keento, wuxuu dhakhtarku ka qaadikaraa dhacaan dhuunta oo la abuuro, si loo hubiyo in benisiiliintu wax kuu tarikarto iyo in kale.

Dhiig-qaadistu waxba dhakhtarka uma soo kordhinkarto, marmar dhif mooyaane.

Caruurta yaryar ee daada xanaanada ku jirta waxa u caadi ah in cunahooga istrebtokoker iskaga jirto. Umma baahna dhakhtarku inuu shay-baadh sameeyo, haddii aanay caruurta ka muuqan astaamaha khaaska u ah xuqadaha/qumanka. Caruurta istrebtokoker cunahooga iskaga jirto, laguma daaweynayo antibiyootika. Beryihii hore, ayaa Sverige lagu arkijiray xuqado istrebtokoker ay keentay oo sababijiray xummadda roomatiisamka iyo kelyo-xanuunka. Waa naadir in wadankaan lagu arku noocyadaasi berigii hore jirijiray. Sidaa awgeed ayaan had iyo jeer loogu baahneeyn in la baadho oo la daweyno cid walba oo istrebtokoker ku sidan karta cunaha.

### Wax ku daweynta antibiyootikada

Haddii dhakhtarku go'aansado in antibiyootika loo baahanyahay, waxa ugu horeeyn la qaadankaraa penicillin, sababta oo ah iyadoo wax weeyn ka tarikarto istrebtokokerta. Markaad 2 ilaa 3 cisho qaadatid penicillin cid kale xanuunka ma qaadsiinaysid.

Ma fiicna in dawoyinka antibiyootikada la iska qaato. Waxa dhicikarta in antibiyotikadu kaa idleeyso nooca bakteeriyyada ee jidhka waxtarka u leh. Waxa kale oo iska qaashada antibiyootikadu kugu keenikarta dhibaatooyin ay ka mid yahiin shuban iyo finan ka soo yaaca oogada. Waxa intaa dheer, in iska-qaashada antibiyootikadu sababto inay bakteeriyyadu u barato oo ay yeelato u-adkeeysi (resistenta). Haddii taasi dhacdo, waxa imanaysa in antibiyootikadu marka dambe waxba ka tariweydo caabuqyada halista ah ee baakteeriyyadu keento ee Aad run-ahaan ugu baahankartid in antibiyootika lagaaga daweyyo.

### Talo

- Cabitaanka iyo kiniinada cunaha loo qaato waa lagu ladnaankaraa.
- Dawoyiinka xanuunka bi'ya, sida paracetamol iyo ibuprofen, kolba sida loogu baahdo ayaa loo qaadan-karaa.
- Si xanuun kala qaadistu u yaraato, faraxalka ama faro-dhiqista ha la badsado.

## **Fiiro gaar ah u yeelo**

Dhakhtarka u tag, haddii xanuunku kugu cusboonaado amma kugu xumaado amma aad ku ladnaanweeydid 3 ilaa 4 cisho gudohood. Waxa kale oo aad dhakhtarka tagtaa, haddii kalawaaxidda afka iyo wax-liqistu kugu adkaadaan; waxa dhici karta inuu jiro ka-soo-bax xoqadaha agtooda ah oo malax leh.



**Folkhälsomyndigheten**  
PUBLIC HEALTH AGENCY OF SWEDEN

Solna Nobels väg 18, SE-171 82 Solna Östersund Forskarens väg 3, SE-831 40 Östersund.  
[www.folkhalsomyndigheten.se](http://www.folkhalsomyndigheten.se)